

Hagahan waxa tusay waxaa la sameynayo haddii qof uu faafiyo sawirkaada oo qaawan iyada oo aan oggolaansho lagaa haysanin adiga.

Waa maxay xadgudubka ku saleysan sawirka?

Hagahan:

- Waa maxay xadgudubka ku saleysan sawirka?
- Sida loo soo sheego xadgudubka ku saleysan sawirka
- Ma lagu hanjabay ama ma lagu cagojungleeyey?
- Sidee ayaan u caawin karaa qof ay sidan ku dhacday?
- Kawaran haddi sidan ay ku dhacday canugeyga?
- Hel caawin iyo taageero




Waa maxay xadgudubka ku saleysan sawirka?

Xadgudubka ku saleysan sawirka waxa uu dhacaa marki qof uu faafiyo sawir ama muuqaal qarsoodi ah, qaawan, ama galmo ah, iyada oo aan oggolaansho laga haysan qofka kadhax muuqdo sawirka ama muuqaalka.

Waxaa sidoo kale dhici karaa marki qof uu faafiyo sawir ama muuqaalka qof oo aanan ulabisneyn qaabkii diinta ama dhaqanka qofku ahaa inuu ugu labisto goobaha fagaaraha ah, iyada oo aan oggolaansho laga haysan qofka.

Sawiradu waxa ay noqon karaan sawiro ama muuqaalo dhab ah, ama kuwo la badalay ama wax laga badalay, tusaale ahaan, kuwa lagu sameeyey Footoshoobka.

Waxaa sidoo kale xadgudub ku saleysan sawir ah haddii uu qof kuugu hanjabo inuu faafinayo sawirkaada oo qaawan adiga oo aan oggolaansho lagaa haysan.



Tusaalooyinka xadgudubka ku saleysan sawirka waxaa kamid ah

- Lamaanahaadi hore oo ku faafinaayo sawirkaada qaawanta Facebook adiga oo aan oggolaansho lagaa haysan.
- Qof beddelayo sawirkaada si aad ugu ekaato qof qaawan kadibna iimayl ugu diraayo dad badan.
- Ciwaan isqarinayo oo kuugu hanjabayo inuu webseed ama meelaha galmada muuqaalka laga daawado ku faafinayo sawirkaada oo qaawan.

Sida loo soo sheego xadgudubka ku saleysan sawirka

Waxaad usoo sheegi kartaa xadgudubka ku saleysan sawirka eSafety. Waxaan ka caawin karnaa in sawirada ama muuqaalada laga saaro iyo, kiisaska qaarkood, inaan tillaabo kaqaadno qofkii faafiyey.

Raac tallaabooyinkaan si aad warbixinta usoo sheegto:

1. Baro wax badan oo ku saabsan xadgudubka ku saleysan sawirka iyo sida loo helo caawin iyo taageero

Waxaan bixinaa talo faahfahsan oo kusaabsan xadgudubka ku saleysan sawirka, oo ay kamid yihiin ilaha iyo taageerida qofkasta oo la kulmay xadgudubka ku saleysan sawirka, iyo saaxiibadooda iyo qoyskooda.

2. Soo aruuri cadeynta iyo xogta kusaabsan

Si aad warbixinta ugu soo sheegto eSafety, waxaa lagaaga baahan yahay inaad soo uruuriso cadeynta sida ka qaadida iskiriinshoot wixii dhacayey. Ka akhri wax badan oo kusaabsan sida loo soo aruuriyo cadeynta.

3. Diyaari warbixinta xadgudubka ku saleysan sawirka

Markii aad soo aruuriso cadeynta iyo xogta ku habboon, waxaad bilaabi kartaa soo sheegida warbixintaada.

Ma lagu hanjabay ama ma lagu cagojugleeyey?

Haddii uu qof kuugu hanjabo inuu faafin doono sawiradaada oo qaawan haddii aadan aqbalin dalabkooda, caawin ayaa lagu heli karaa.

Wax lacag ah hasiin ama bitcoin — inaad lacag siiso qofka hanjabaada lacagta kugu weydiisanayo waxaa kadhalan doonto inay sii dalbadaan lacag badan.

Raac tallaabooyinkaan:

1. Jooji dhammaan xariirada aad la sameyneyso qofka hanjabaada lacagta kugu weydiisanayo.

2. Kaqaad sawirka iskiriinshootka hanjabaadaha lagu soo jeedinayo kadibna baloog saar/iskaxir qofka.

3. Ka akhri taladeena kusaabsan sida wax looga qabto baadda galmada.

Caawinta lagu helaayo luuqadaha marka laga reebo luuqada Ingiriiska

Wac [Adeega Tarjumaada iyo Fasirida](#) lambarka 131 450 kana codso inay kuula xariiraan mid kamid ah lambarada khadka caawinta ee kore.

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa [Adeega Tarjumaada iyo Fasirida](#) lambarka 131 450, marki aad warbixin noo soo gudbiso oo aana kusiinay taleefan nambar aad nagala soo xariirto.

Hagitaanada kusaabsan [sida wax looga qabto xadgudubka ku saleysan sawirka waxaa lagu heli karaa 12 luuqadood oo kale](#), - Carabi, Shiinees dhaqameed, Shiinees la fududeeyay, Vietnamese, Tamil, Thai, Persian, Filipino, Hindi, Spanish, Punjabi, iyo Karen.

Haddii aad dhagool tahay ama maqalka nafo katahay

Laxariir [Speak and Listen](#) (Hadal oo Dhageyso) (Xulashooyinka wicitaanka dadka dhagoolka) lambarka 1300 555 727 kana codso inay kuu wacaan lambarka khadka caawinta, ama inaad nala soo hadasho marki aad warbixin soo gudbisay.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad kaheli kartaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan xadgudubka ku saleysan sawirka, oo ay kamid tahay talada kusaabsan sida loogu soo sheego eSafety loona helo caawinta in laga saaro sawirada qaawan, qeybta xadgudubka ku saleysan sawirka ee webseedkeena.

